

4 TALLAABO EE GARGAARKA KOWAAD EE ASMADA (NEEFTA)



Qofka kor u fariisi

Sii 4 baaf oo kala-duwan ee dajiyaha bafarka buluugga/beyga ah

- Rux bafarka (daawada lagu neefsado)
- Ku-shub 1 baaf tuumbada (spacer)
- Ka-qaado 4 neefsi tuyuubka (spacer)

Ku-celceli ilaa intaad ka qaadanayso 4 baaf

Xusuusnow: **rux, 1 baaf, 4 neefsi**

AMA sii 2 dhoos oo kala-duwan ee neef-dejiyaha Bricanyl (da'da 6 & wixii ka weyn) ama neef-dejiyaha Symbicort (wixii ka weyn 12)



Sug ilaa 4 daqiiqo

Haddii aysan jirin wax kasoo-rayn ah, sii 4 baaf dheeraad ah oo kala-duwan ee dejiyaha buluugga/beyga ah sida kore


AMA sii 1 dhoos oo dheeraad ah ee dejiyaha Bricanyl ama Symbicort



Haddii aysan jirin wax kasoo-rayn ah ka wac Saddex Eber (000) ambalaaska

Ku-wad siinta 4 baaf oo kala-duwan 4 daqiiqo oo kasta ilaa intay soo-gaarayso caawimaadda degdegga

AMA 1 dhoos oo Bricanyl ama Symbicort ah 4tii daqiiqoba – ilaa 3 dhoos oo dheeraad ah ee Symbicort



Isla-markiiba wac caawimaadda degdegga ah. Wac Saddex Eber (000):

- Haddii uusan qofku neefsanayn.
- Haddii asmada qofka ay si kedis ah uga sii darto, ama aysan ka soo raynayn.
- Haddii uu qofku ay hesho kediska asmada oo aana lahayn dejiyaha.
- Haddii aadan hubin inay asmo tahay iyo in kale.
- Haddii qofka lagu yaqaanb inuu qabo anaphylaxis – raac Qorshaha Tallaabada Anaphylaxis, ka dibna sii Gargaarka Kowaad ee Asmada. Daawada dejiyaha Buluugga/beyga ah lagama yaabo inay waxyeesho, xataa haddii qofku uusan qabin asmo.

Ilaali naftaada xilligan manka ah.

Maaraynta arimaha asmada iyo aleerjikada.

Ka eeg betterhealth.vic.gov.au ama ka wac 1800 ASTHMA (1800 278 462) wixii macluumaad dheeraad ah.

Waxaa idmay oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne (1708026)

© Dowlad-goboleedka Victoria (Department of Health and Human Services).

Marka laga reebo astaanta, waxaa lagu ruqseeyey laysanka CC BY International 4.0.



**ASTHMA
AUSTRALIA**

